

PPT iyo waxbarashada gaarka ah

Haddii canuggaagu uusan helin faa'iido ku filan oo uu ka helo waxbarashada gaarka ah, asaga ama ayadu wuxuu qaadan karaa waxabarashada baahiyaha gaarka ah.

Waxbarashada gaarka ahi waxay, tusaale ahaan, la micno noqon kartaa in ardaygu ka shaqeeyo si waafaqsan hadafyada waxbarashada ee kaladuwana marka loo barbardhigo ardayda kale, ama in macallinku ama kaaliyuhu korjoogteeyo uuna gacan ka siiyo ardayga fasalka, ama in ardayga la siiyo qalab gaar ah oo loogu tala galay. Waxbarashada gaarka ah waa in la meelmariyaa si loo daboolo baahiyaha canugga, waxaana la bixin karaa ayadoo qayb ka ah fasalka oo dhan, koox ahaan ama shakhsi ahaan.

Haddii adiga ama dugsigu aad ka welwelsan tihiin in canuggaagu uusan helayn faa'iido ku filan oo uu waxbarashada ka helaayo, dugsigu waxaa laga raba in uu xaaladda diyaariyo si uu u daboolo baahiyaha canuggaaga. Haddii tallaabooyinkaasu ku filnaan waayaan, dugsigu iyo Adeegga Talo bixinta Maskaxda iyo Waxbarashada (PPT) waa in ay qiimeeyaan talada ku saabsan waxa canuggaagu u baahan yahay.

PPT waa adeeg bulsho kaasoo sameeya qiimeyn qoto dheer (luuqadda Norway lagu yiraahdo: sakkyndig vurdering), asaga oo ah qaab dukumiinti kaasoo muujinaya in ardaygu u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo in kale. Dugsigu waa in uu go'aansado in ardaygu xaq u leeyahay waxbarashada gaarka ah iyo in kale, iyo waxa waxa waxbarashada gaarka ahi noqonayso. Mar kasta racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aanka.

Waa maxay PPT?

PPT waxay siisaa tallo bixin rowdooyinka iyo dugsiyada talooyinkaas oo ku saabsan isu diyaarinta caruurta, dadka da'yarta ah iyo dadka waaweyn ee qaba baahiyaha gaarka ah. PPT waxay ka qayb qaadan kartaa wadashaqayn qaybo badan iskugu irta oo heer maxali ah, tusaale ahaan adeegga caafimaadka ama Adeegga Xannaanada Caruurta Norway (luuqadda Norway lagu yiraahdo: barneverntjenesten), iyo heer qaran, tusaale ahaan adeegga waxbarashada gaarka ah ee qaranka (luuqadda Norway lagu yiraahdo: Statped). PPT waxaa lagu maamulaa qarsoonaanta sirta.

Maxaad ka filan kartaa dugsigu?

Dugsigu waa in uu

- xaqiijiyaa in danaha ardayga ugu wanaagsan la ilaaliyo
- ku lugyeesho kulana tashado kahor inta uusan qaadan go'aan saamayn ku yeelanaya canuggaaga

- qaado wareysiyo uu la yeelanayo arday ama waalidiinta uuna sameeyo qiimeynta muhiimka ah ee ardayga
- codsado in PPT ay ku siiso qiimeyn qoto dheer haddii aad codsato, iyo haddii dugsigu qabo fikrad ah in ardaygu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah
- meelmariyo go'aanka gaarka ah kaasoo sheegaya in ardaygu u baahan yahay iyo in uusan u baahnayn waxbarashada gaarka ah haddii uu u baahan yahayna, nooca ay noqonayso
- inuu diyaariyo manhajka maaddada ee gaarka ah (luuqadda Norway lagu yiraahda: IOP)
- siiyo ardayga qaba baahiyaha gaarka ah sida ku cad go'aanka qofka iyo IOP-ga, taasoo sida caqligalka ah qayb ka ah fasalka
- diyaariyo warbixinta qoran ee sannadlaha ah ee ku saabsan waxbarashada gaarka ah iyo horumarka
- xaqiijiyo in adiga iyo canuggaagu la siiyo hagitaanka ku saabsan waxa qiimeyntu tahay ee leh iyo tan aan lahayn fasalada ee dugsiyada sare, kahor inta aadan samayn go'aan

Maxaad samayn kartaa?

Ka waalid ahaan, waxaad

- dalban kartaa in dugsigu qiimeeyo in canuggaagu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah
- waxaad tabashadaada kala hadli kartaa PPT iyo dugsiyada kahor inta aadan soo gudbin
- waa inaad ku lugyeelataa oggolaanshahaagana bixisaa kahor inta dugsigu codsan in PPT ay qiimayn ku samayso canuggaaga
- waa in aad ku lugyeelataa aqbalaaddadadana bixisaa kahor inta dugsigu uusan go'aansan in canuggaagu u baahan yahay in uu qaato waxbarashada gaarka ah
- waa in aad heshaa warbixinta sannadlaha ah ee qoraalka ah ee ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee canuggaagu helayo iyo qiimaynta horumarka iyo horusocodka canuggaaga
- waxaad gudbin kartaa racfaan haddii canuggaaga aan la siin waxbarashada gaarka ah
- waxaad racfaan ka qaadan kartaa waxa la baranayo, la meelmarinayo a,a ururada waxbarashada gaarka ah
- waxaad go'aansan kartaa in canuggaaga laga reebayo qiimaynta fasalada dugsiyada sare ee mooddooyinka uu ka qaato ama ay ka qaadato waxbarashada gaarka ah